Barnaamijka Ka Dhimista Canshuurta Hantida Dadka Da'da Weyn Iyo Naafada Ah

Assaasiyaadka Ku Saabsan Barnaamijka

Barnaamijka waxaa heli kara mulkiileyaasha ee buuxiya shuruudaha da'da, dakhliga iyo mulkiilenimada ee soo socda:

1 – DA'DA:

- Mulkiileyaaha ee ah ugu yaraan 61 sano jir marka ay tahay 31-ka Diisambar ee sanadka kahor inta wakhtiga canshuur-bixinta (markaa 62 jir sanadka ka-cafinta). (waxaa looga baahan yahay caddaynta da'da)

OR

NAAFONIMADA:

- Mulkiileyaasha aan awoodin inay shaqeeyaan sabatuna tahay naafonimo ma laha shuruud da'da. (waxaa looga baahan yahay caddaynta naafonimada)
- AMA, Ciidan ka soo dagaalame ee xaqa u leh oo ka qaata magdhow Waaxda Hawlaha Ciidan Ka Dagaalamay-yaasha ee Mareykanka qiimaha naafonimada guud ee naafada la xiriira ka-adeega-ciidanka. (dukumeentiyo ayaa loo baahan yahay)

IYO,

2- DAKHLIGA:

- Dadka Da'da Waaweyn ee leh dakhliga qoyska sanadlaha ah, ee soo hara ee xorta ah ee:
  - $ 40,000 ama wax ka yar ee la bilaabay 2016 iyo waxii ka dambeeyey AMA
  - $ 35,000 ama wax ka yar ee la bilaabay 2015 iyo wixii ka horeeyey.
    - Dakhliga soo hara ee xorta ah waxaa KA MID AHAAN doona alaabooyinka aan loo tixgelinin si ah Dakhliga ka imaada IRS sida dhammaan amniga bulshada, dakhliga dulsaarka ee la canshuuri karo ama kan aan la canshuuri karin.
    - Iyo, WAXAA LOO OGGOLAAN doonaa alaabooyinkaas inay ahaadaan khasaare miisaaniyadeed ama hoos u dhaca qiimaha kirada si loo yareeyo dakhliga.
    - Liis sii faahfaahsan ee dakhliga lagu daro wuxuu ku qoran yahay dhammaadka qaybta su'aalaha iyo jawaabta.

Dakhliga Qoyska waxaa ka jira adiga, xaaskaaga, nolol la wadaagaaga ama qofka kula dagan iyo qofka ka leh dan mulkiilenimada guriga.

(Caddaynta dakhliga ka soo gala rasiidhyada, jeega macaashka, soo celinta IRS, 1099ka, qoraalada bangiga ama dukumeentiyo kale, ayaa loo baahan yahay.)

Gobolka Washington sidoo kale wuxuu leeyahay Barnaamij dib u dhiga. Fadlan wac si aad u hesho macluumaad si dheeraad u gaar ah.

IYO,

3- MULKIILENIMADA IYO DAGANAASHAHA:

- Shakhsiyaadka codsanaya ka cafinta waa inay ahaadaan mulkiilaha IYO dadka u dagan hantida/guriga si ah degaankooda joogtada ah.

  Waa inaad gurigaaga lahaataa Diisambar 31-keeda ee sanadka *kahor* marka ay tahay inaad canshuurta bixiso.

  Mulkiilenimaa waa inay ahaataa mid guud ahaan mulkiilaha lacag ku gatay, iyada oo loo marayo hantida nolosha ee diiwaangashan (heshiis ah nolosha oo dhan/lease for life) ama iibsashada qandaraaska.

  Haddii mulkiilenimada lala wadaago qof kale, tusaale ahaan wiilkaaga ama gabadhaada la dhalay, ka cafintaada ayaa la isku-hagaajin doonaa si ay u muujiso/xisaabto qaybtaada lahaanshaha/mulkiilenimada.

Tusaale ahaan: Waa inaad gurigaaga lahaataa marka ay tahay Diisambar 31, 2016 si aad ugu qalantid ka cafinta canshuurta 2017.
Tusaale ahaan: Adiga, wiilkaaga iyo gabadhaada dhammaantiin waxaan haysataan 1/3 ee mulkiilenimada guriga. Qaybtaada hantida/guriga waa 1/3 sidaa daraadeed ka cafintaada waxay ku egtahay qiimaha 1/3. (dukumiintiyada ayaa looga baahan yahay si loo ogaado mulkiilenimada iyo degenaanshaha)

Waxyaabaha ay tahay in la ogaado *HADDII* aad xaq u leedahay barnaamijka:

- Ka cafinta qiimaha guriga ee canshuuri karo way joogsan laga bilaabo 1-da Janaayo ee sanadka codsiga hore.
-Waxaad heleysaa, ugu yaraan ka cafinta bixinta dhammaan canshuurta dheeraadka ah (tusaale ahaan canshuurta dugsiga iyo bondiga/shahaadada bagiga).
- Waxaad sidoo kale aad heli kartaa ka cafin ah qayb ka mid ah canshuuraha caadiga ah.
- Qiimeeyuhu wuxuu sii wadi doonaa inuu ogaado qiimaha suuqa ee hantida/guriga sanad walba.
- Waxaad sii wadi doontaa helitaanka ogeysiiska sannadlaha ah ee isbeddelada qiimahaaga suuqa.
- Sanad kasta, canshuurtaada waxaa lagu xisaabin doonaa qiimo ka hooseeya qiimaha suuqa ama qiimaha asalka ah ee lagu joojiyey.

Qaybaha ka cafinta canshuurta – lagu dhaqmayo laga bilaabo 2016 iyo wixii ka dambeeya:

HEERARKA KA CAFINTA	QIIMAHA KA CAFINTA CANSHUURTA
Heerka 1 ama Ka cafinta S: $ 35,001 ilaa $ 40,000	Ka dhaafida canshuurta dheeraadka ah (cod-bixiyaha uu ansaxay)
Heerka 2 ama ka cafinta P: $ 30,001 ilaa $ 35,000	Ka dhaafista canshuurta dheeraadka ah, oo lagu daray hoos u dhimista qiimaha la qiimeeyay ee 35% ama $ 50,000, hadba kan sareeya. Laakiinse aan ka badnayn $ 70,000.
Heerka 3 ama ka cafinta F: $ 0 ilaa $ 30,000	Ka dhaafista canshuurta dheeraadka ah, oo lagu daray hoos u dhimista qiimaha la qiimeeyey ee 60% ama $ 60,000, hadba kan sareeya.

SU'AALAHA BADANAA LA WEYDIIYO ama MAXAA DHACAYA HADDII?

Maxay tahay sababta uu khadka AGI (dakhliga guud ee la habeeyey) ee soo celinta IRS uu muujinayo inaan ka hooseeyo $ 40,000 weli na la iidiiday ka cafiska?

Sharciga cashuurta federaalka **MA AH** la mid shuruucda xukuma barnaamijka gobolka ee ka dhaafida hantida canshuurta.

Iyada oo aynu isticmaaleyno soo celinta IRS si ah meesha laga bilaabo, waa tixgelinnaa ilaha kale ee dakhliga ah ee uu sharciga federaalka laga yaabo in uusan u tixgelin waxa la canshuuri karo.

Labo tusaale oo kala duwan ee IRS iyo sharciyada Gobolka waa:

- Sharciyada IRS ee federaalka, amniga bulshada waxaa laga yaabaa in laga reebo dakhliga la canshuuri karo, waxaa laga yaabaa in qayb ahaan loo canshuuri karo ama waxaa laga yaabaa in si buuxda loo canshuuri karo.

Barnaamijka ka cafinta cashuurta hantida/guriga, waxaan tixgelinaa lacagta amniga bulshada ee si dhab ah aad u heshosi ahaan jeeg ama lacag toos laguugu soo shubo si ah dakhli. Lacagtaas waxaa loo isticmaali doonaa xisaabinta dakhliga, iyada oo ay la socot macluumaad kale oo ku saabsan soo celinta canshuurtaada, marka aan xisaabinayno dakhliga soo hara ee xorta ah.

- Sharciga Federaalka ee IRS wuxuu u ogolaanayaa dhimis hasaaraha raasumaalka. Tani waxay yarayn kartaa faa'iidooyinka raasamaalka ee la canshuuri karo Wixii ku saabsan barnaamijka ka cafinta cashuurta hantida/guryaha, MA ogolaanayno wax ka dhimid ah wixii khasaara raasumaal ah. Waxaan ku dari doonaa faa'iidooyinka raasumaalka iyada oo aan wax khasaara ah laga jarin.

Labada waxyaaloodba waxay kuugu keeni karaan xadidaada dakhliga ee ah $40,000 ee barnaamijka ka cafinta cashuurta hantida/guriga xitaa haddii AGI-ga soo celinta canshuurtaada uu ka hooseeyso $40,000.

Maxaad u dooneysaa soo celinta IRS-keega?

Shuruucda canshuurta federaalka iyo shuruucda ka dhaafinta canshuurta hantida way kala duwan yihiin. Hasa ahaatee, waxaan u isticmaalnaa soo celinta IRS si ah meesha laga bilaabo si loo xisaabiyo iyo loo xaqiijiyo dakhligaaga iyo in la go'aamiyo heerka ka cafintaada.

Maxaa dhacaya haddii aanan fayl gareenin soo celinta IRS?

Weli waxaan u baahanahay inaan xaqiijino ilaha dakhligaaga.

Waxaan codsan doonaa macluumaad ah sida lacagta bangiga kuu taalo, 1099-yada, macluumaadka morgijka la celiyo, qoraalka amniga bulshada ama qoraalada dhamaadka sanadka ee bixiya macluumaad ku saabsan sida aad u bixiso kharashyadaada maalinlaha ah, bil kasta ah iyo masaariifta sanadlaha ah.

Miyaan u baahan doonaa inaan dib u codsado haddii aan hore la iigu ansixiyay ka cafinta?

Waxaa lagaa doonayaa inaad dib u codsato ugu yaraan 4-tii sano ba mar iyo aad bixiso dhammaan dokumentiyada cusub. Waxaanu soo diri doonaa warqada codsiga cusbooneysiinta marka ay tahay wakhtiga aad u baahan tahay inaad dib u codsato.

Maxaa dhacaya haddii aan ku guuldareysto inaan ka jawaabo codsiga dib u cusboonaysiinta?

Haddii aadan ku guuldareysato soo celinta foomka cusboonaysiinta iyo dukumiintiyada lagama maarmaanka ah, waxaa lagaa saari doonaa barnaamijka oo waxaad billaabi doontaa bixinta lacagta canshuurta oo buuxda iyadoo lagu saleynayo qiimahaaga suuqa ee hadda jira.

Ka waran haddii aan ku guuldaraysto inaan la soo diro dukumentiyadeydaa codsiga cusbooneysiin ah?

Waxaanu kuu soo diri doonaa warqad aan kugu codsanayno macluumaadka maqan. Waxaad heesan doontaa 30 maalmood si aad uga jawaabto.

Haddii aanan wali war kaa maqal ka dib ogeysiiskan labaad, ka cafintaada ayaa la saarayaa oo waxaad billaabi doontaa bixinta lacagta canshuurta oo buuxda iyadoo lagu saleynayo qiimahaaga suuqa ee hadda jira.

Ka waran haddii aan u baahdo caawimaad fayl gareynaya foomka ama aad qabtid su'aalo ku saabsan dukumeentiyada aad u baahan tahay?

Fadlan wac xafiiska xafiiskayaga 206-296-3920.

Waxaanu la kulannay shaqaale ka-dhaafitaan diyaar ah oo diyaar u ah inay kaa caawiyaan buuxinta foomamka. Waxay sidoo kale ka jawaabi karaan su'aalaha ku saabsan dukumiintiyada ay tahay inaad bixiso.

Ka waran haddii isbeddel ku dhaco dakhligeega iyo aysan aheen wakhtiga ay tahay inaan cusbooneysiiyo codsigayga?

Waa mas'uuliyadaada inaad u sheegto Qaybta Ka cafinta marka uu kugu dhaco xaalad ah isbeddelka-nolosha oo saameyneysa ka cafintaada.

Fadlan naga soo wac 206-296-3920 ama noo soo qor warqad si aan uga wada hadalno xaalada.

<u>Tusaale ahaan:</u>

-Haddii aad gaarto da'da 70-1/2 sano, waxaa laga yaabaa inaad u baahato inaad billaabato soo baxsiga IRA-gaaga ama dakhliga sanadlaha ah (Annuity funds). Tani waxay keeni kartaa isbedelka heerka ka cafintaada.

-Haddii aad weydo lamaane ama nolol la wadaage, tani waxay keeni kartaa isbeddelka heerka ka cafintaada.

-Haddii aad siiso dhammaan ama qeyb ka mid ah hantidaada qof kale, tani waxay keeni kartaa isbeddelka

heerka ka cafintaada.

-Haddii aad ka shakisan tahay in duruufahaaga isbeddelka saameyn karaan heerka ka cafintaada, fadlan kala soo xiriir xafiiskeena siaad u hesho caawimaad lambarka 206-296-3920.

Mar haddaan codsaday ka cafin, goorma ayaan war ka maqli doonaa xafiiskiina?

Waxaan heleynaa warqad kuu sheegaysa inaan hayno codsigaaga.

Kadibna, iyada oo ay ku xirantahay tirada shaqada ee hadda, laakiinse waa inaad heshaa warqad muddo ah 6-8 toddobaad gudahood.

Warqadan labaad waxay sheegi doontaa mid ka mid in

(1) laguu ogolaaday ka cafin iyo in isku hagaajin lagu sameyn doono canshuurtaada sanadlaha ah ama

(2) in laguu diidey ka cafinta oo lagu siiyay xuquuqdaada rafcaanka ama

(3) in aan weli u baahanahay macluumaad dheeraad ah.

Waa maxay qiimo joojinta?

Qiimaha suuqa ee gurigaagu waa "la joojin" laga bilaabo 1-da Janaayo ee sannadka ugu horeeya ee aad u qalanto ka cafinta canshuurta hantida/guryaha. Sannad kasta kaddib marka aad hesho oggolaanshaha ugu horeeya, waxaa lagugu canshuuri doonaa qiimo ka yar qiimaha asalka ah ee la joojiyey ama qiimaha suuqa ee hadda jira, hadba kan hooseeya.

Miyuu qiimahaygu ka kor sareen karaa qiimaha la joojiyey?

Haa. Haddii aad ku darto dhismo cusub gurigaaga, kaba dhig waxaad ku dartay musqul cusub, qiimaha ku darida cusub ayaa lagu darayaa qiimaha la joojiyey. Wadartan cusub, waxay noqon doontaa qiimaha la canshuuri karo ee cusub ee la joojiyey.

Maxaa dhacaya haddii aan ku jiray barnaamijka dhowr sanadood oo hadda aanan u qalmin?

Haddii dakhligaagu uu dhaafo xadidaada ah $40,000, waa in lagaa saaraa barnaamijka halka sano ee aadan u qalmin. Waxaad bixineysaa canshuurta sare ee qiimahaaga suuqa ee hadda jira ee halkaa sano.

Hasa ahaatee, dib ayaad u codsan kartaa sanadka soo socda waxaana laga yaabaa in dib loo soo celiyo qiimaha la joojiyey ee asalka ah haddii dakhligaagu uu ku soo noqdo heer ka hooseeya $40,000 sanadkaa xiga. Waxaad kaliya bixinaysaa canshuurta sare halka sano ee aadan u qalmin oo markaa kadib waxaad heli dib ugu laabashada barnaamijka iyo bixin qiimaha la dhimay.

Tusaale ahaan:

Sannadkaagii ugu horreeyay ee xaq u yeelashada waa 2013 ee uu leh qiime la joojiyey oo ah $300,000.

Hadda, dakhligaaga ee 2016 wuxuu dhaafayaa $40,000 sababtoo ah lacag hal mar ee ah lacag bixinta IRA.

Waxaan kaa saari doonaa barnaamijka canshuurta 2017 waxaadna bixin doontaa biilka canshuurtaada caadiga ah iyadoo ku saleysan qiimaha suuqa ee hadda jira.

Haddii dakhligaagu uu ku soo laabto heerarka ka hooseeya $40,000, waxaad dib u codsan kartaa canshuurta sanadka 2018, ku noqan $300,000 ee asalka ah ee qiimaha la joojiyey iyo aad bilaabi helitaanka canshuur dhimista mar kale.

Ka waran haddii aan ka sareeyo xadka dakhliga muddo ka badan hal sano?

Haddii dakhligaaga uu kordho muddo ka badan hal sano, waxaa lagaa saari doonaa barnaamijka ka cafinta cashuurta waxaadna bilaabi doontaa inaad bixiso qiimahae canshuurt ee sare ee qiimahaaga suuqa ee hadda jira. Haddii, mar ka mid ah mustaqbalka, dakhligaagu uu mar kale ka hooseeyo xadka $40,000, waxaad dib u codsan kartaa barnaamijka. Hasa ahaatee, maaddaama aad ka maqnaan lahayd barnaamijka in ka badan hal sano, qiimahaaga joojinta ee cusub ayaa la go'aamin doonaa sanadka aad dib u codsatid oo aad abuuri doonta

qiimahaaga joojinta ee cusub iyo sanadka joojinta.

Maxaa dhacaya haddii aan guuro?

Haddii aad iibsato guri cusub, shaqo yar ama guri la qaadi karo/moobayl ah, waxaad awoodi kartaa inaad u wareejiso ka cafintaada hantida/guriga cusub. Waa inaad dib u codsataa oo aad qalantid ka cafinta ee guriga cusub. Qiimo joojinta cusub ayaa la dhisi doonaa iyada oo ku saleysan macluumaadka cusub.

Maxaa dhacaya haddii caruurtayda jooga meel gobolka ka baxsan ay iga caawiyaan masaariifta igu baxa bil walba?

Ma tixgelineyno hadiyado ka yimaada dakhliga carruurtaada laakiinse waxaad u baahan doontaa inaad noo soo sheegto qiimaheeda.

Maxaan sameeyaa haddii aanan lahayn dakhli ama dakhli aad u hooseeya?

Xitaa haddii aanad lahayn dakhli, waxaad ku bixisaa masaariifta qaar ah ilo dhaqaale.

Xaaladaha badan kood dadka waaweyn waxay isticmaalaan dib-u-celinta moorgijka, ka helaan lacag carruurtooda ama isticmaalaan koontada kaydka si ay u bixiyaan masaariifta gurigooda. Iyada oo ilahaas aan loo tixgelin "dakhli" marka xisaabinta dakhligaaga soo hara ee xorta ah, waxay yihiin ilo dhaqaale oo waa inaad soo sheegtaa ilaha iyo qiimaheeda.

Waxaa la qirayaa in ay jiraan kharashyo la socdaa noolasha iyo in haysashada guri. Alaabooyinka sida cuntada, gaaska gawaarida iyo korontada iyo biyaha ayaa la bixiyaa ugu yaraan. Taasi kadib, MA ansixinayno codsi leh dakhli la soo sheego oo ah EBER ($0).

ILAHA DAKHLIGA EE SUURTAGALKA AH EE BARNAAMIJKA KA CAFINTA DADKA DA’DA WAAWEYN EE LAGA YAABO IN LOO XISAABIYO SI KA DUWAN

LOOGU TALAGALAY IRS: Tani ma aha liiska oo dhan. Haddii aad qabto su'aalo gaar ah oo ku saabsan dakhligaaga, fadlan wac.

Mushaharka La Shaqeeysto	Amniga Bulshada	Faa'iidooyinka VA-ga qaar kood ama Dakhliga Naafadnimada
Lacag bixinta IRA ama Dakhliga sanadlaha ah (Annuity)		Dakhliga Shaqa la'aanta
IRS-ta la Canshuuri karo iyo tan AAN-la-canshuuri karin iyo faa'iidada		guusha qamaarka
Faa’iidooyinka Raasumaalka – MA jiro ka dhimis la ogolyahay		Lacagta uu helo Lamaanahaaga ama Qofka Kula Dagan
Dakhliga Kirada KAHOR ka jarida hoos u dhaca		hoos u dhaca Dakhli Ganacsiga KAHOR